

X.M.J. ee 9 Oktoobar 1961, lamba. 256

Dhisidda Hayadda Isboortiga.

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay qodobka 75, ee Dastuurka;

X.M (Xeer Maamul), ee 18 Maajo 1961, lamba. 78;

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in Guddoonka Golaha Wasiirrada laga dhiso Hayad ujeeddadeed tahay in horuumariso, abaabusho, kobcisa, taageerta, hore-u-marisa sboortiga;

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in matalaadda lagu aamino Guddoomiyaha Gobolka Benaadir “ku meel gaar ahaan”;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Asaga oo ka ambaqaadays soojeedinta Wasiirka Kowaad.

WUXUU XEERINAYAA

Qod. 1

Waxaa Guddoonka Golaha Wasiirrada laga dhisay, laga bilaabo 1^{da} Jennaayo 1961, Hayadda Isboortiga oo leh sharsiyaddeeda qaanuun, ee Qaanuunka Guud.

Qod. 2

Góaanno dambe ayaa lagu ansixinayaa Dastuurka Hayadda iyo xeerarka qaab-dhismeedka iyo hawlgalkeeda.

Qod. 3

Ilaa inta laga ansixinay (la soo saarayo) Dastuurka iyo xeerarka ku xusan qodobka hore, matalaadda Hayadda waxaa la siinaya Guddoomiyaha Gobolka Benaadir oo, sida ugu dhaqsiiyaha badan, ula wareegaaya xilka Maamulaha isboortiga Soomaaliya.

Muqdisho, manta oo taariikhdu tahay 9 Oktoobar 1961.

Aden Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Waa arkay waana Diiwaangeliyey –

Diiw. 9, xaashi lamba. 26.

Muqdisho, 23 Oktoobar 1961.

Ku-simaha Hanti-dhowraha: **Cali Axmed Cumar**